# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## XEERKA CIIDANKA ILAALADA XEEBAHA SOMALILAND
## XEER LR. 85/2018

**Tusmada Xeerka**
*(oo aan ku darnay iyo dhowr sharaxaad-hoose (footnotes))*

**Wareegto Madaxweyne**

**Aaraar**

**QAYBTA 1AAD QODOBBADA GUUD**
Qod. 1aad Magaca Xeerka
Qod. 2aad Eray-bixin
Qod. 3aad Ujeeddada Xeerka
Qod. 4aad Baaxadda Xeerka

**QAYBTA LABAAD AASAASKA CIIDANKA ILLAALADA XEEBAHA SOOMAALILAND**
Qod. 5aad Aasaasidda Ciidanka Ilaalada Xeebaha
Qod. 6aad Shakhsiyadda Qaanuun ee Ciidanka Ilaalada Xeebaha
Qod. 7aad Astaanta Ciidanka Ilaaladda Xeebaha
Qod. 8aad Xarrunta Taliska Iyo Xarun Goboleedyo

**QAYBTA SADDEXAAD HAWLAHA, WAAJIBAADYADA IYO AWOODAHA CIIDANKA ILAALADA XEEBAHA**
Qod. 9aad Xadka Awoodda Fulineed
Qod. 10aad Waajibaadka
Qod. 11aad Awoodaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha
Qod. 12aad Wada shaqaynta Ciidanka Ilaalada xeebaha iyo Wasaaradda u xilsaaran Arrimaha Kaluumaysiga iyo Khayraadka Badda
Qod. 13aad Abuurida Igaadhsiinta Ciidanka Ilaalada Xeebaha

**QAYBTA AFRAAD QAABDHISMEEDKA CIIDANKA ILAALADA XEEBAHA**
Qod. 14aad Awoodaha iyo doorka Madaxweynaha
Qod. 15aad Awoodaha iyo Doorka Wasiirka Arimaha Gudaha
Qod. 16aad Qaabdhismeedka Ciidanka Ilaalada Xeebaha
Qod. 17aad Qaabdhismeedka Darajada Ciidanka Ilaalada Xeebaha
Qod. 18aad Dirayska Ciidanka Ilaalada Xeebaha
Qod. 19aad Taliyaha Ciidanka Ilaalada xeebaha
Qod. 20aad Ku xigeeenka Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha
Qod. 21aad Shaqo kasaaris/eryidda Taliyaha ama Ku xigeenka Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha

**QAYBTA SHANAAD XULISTA IYO TABOBARISTA SARAAKIISHA CIIDANKA ILAALADA XEEBAHA**
Qod. 22aad Qiimaynta Aqoonta Iyo Tabobarka Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebaha
Qod. 23aad Shuruudaha xulashada saraakiisha, saraakiil xigeenka iyo askarta ciidanka Ilaalada Xeebaha

Qod. 24aad Nidaamka Loo Soo Xulayo Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebta
Qod. 25aad Tabobarka Aasaasiga ah ee Ciidanka Ilaalada Xeebaha

**QAYBTA LIXAAD NIDAAMKA ANSHAX MARINTA**

Qod. 26aad Nidaamka Anshax Marinta Saraakiisha Haysa Xil Sare oo Magacaabis ah
Qod. 27aad Nidaamka Anshax Marineed Ee Saraakiisha Iyo Shaqaalaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha.
Qod. 28aad Fal Anshax Darro Iyo Nidaamka Anshax Marinta
Qod. 29aad Dhimashada, Dhaawaca Iyo Naafada Xubnaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha

**QAYBTA TODDOBAAD XIDHIIDHKA SHAQAALENIMO**

Qod. 30aad Shaqaaleynta Shaqaalaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha
Qod. 31aad Mushaharka Iyo Magdhawga Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebaha
Qod. 32aad Iskhilaaf Daneed
Qod. 33aad Dalacsiinta, Derejo Dhimista , Shaqo Ka Eriga Iyo Is Casilista Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebaha
Qod. 34aad Mas'uuliyadda Dambi
Qod. 35aad Mas'uuliyad Madani
Qod. 36aad Fayl Gaar Ah
Qod. 37aad Dhaarta Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebaha

**QAYBTA SIDDEEDAAD MIISAANIYADDA**

Qod. 38aad Miisaaniyadda Iyo Maamulka Xisaabaadka Ilaalada Xeebaha
Qod. 39aad Biladaha iyo Abaal Marinada
Qod. 40aad Hanti Dhawrka
Qod. 41aad Hantida Iyo Agabka Ciidanka Ilaalada Xeebaha

**QAYBTA SAGAALAAD QODOBO KAMA DAMBEYS AH**

Qod. 42aad Xeer-Hoosaadyo
Qod. 43aad Laalis/Nasakhid
Qod. 44aad Dhaqangalka

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-243/122018 Taar: 29/12/2018

## Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Xeerka Ciidanka Ilaalada Xeebaha Somaliland**
**Xeer Lr. 85/2018**

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada Go'aan Lr.GW/KF-38/822/2018, ee ku taariikhaysan 18/12/2018, ujeeddadiisuna tahay soo gudbin go'aanka ansixinta Xeerka Ciidanka Ilaalada Xeebaha Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobada 75aad iyo 76aad, ee Datuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Waxaan soo-saaray;

Wareegtadan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Xeerka Ciidanka Ilaalada Xeebaha Somaliland, Xeer Lr. 85/2018.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND
# GOLAHA WAKIILLADU

**Markuu Arkay: -** Qodobada 38aad, 74aad (1) 76aad, 77aad, 78aad iyo 124aad (1) ee Dastuurka Jamhuuriyda Somaliland**.**

**Markuu Arkay: -** Baahida loo qabo diyaarinta Xeerka Illaalada Xeebaha Somaliland kaasi oo lagu qeexo awooda qaranka ee xadbiyoodyada qaranka iyo awoodaha ciidanka ee hirgalinta sharciyada badda

**Markuu Ogaaday:** In xeerku muhiiim u yahay abuurida qaab- dhismeedka Ciidanka Ilaalada Xeebaha iyo qeexida xilka iyo waajibaadkiisa.

**Markuu tixgaliyay:-** In la sugo amniga biyo badeedyada somaliland isla markaana la ilaaliyo khayraadka ku duugan oo mood iyo noolba leh.

**Markuu Arkay:-** In ay muhiim tahay in la helo ciidan u xilsaaran ka hortagga iyo baadhista dambiyada ka dhaca badda, sidoo kalana horgeeya cida lagu helo faldambiyeedyada bada maxkamadaha awooda u leh si loo waafajiyo sharciga.

**WUXUU ANSIXIYAY XEERKAN**

## QAYBTA 1AAD
## QODOBBADA GUUD

### <u>Qodobka 1aad</u>
### <u>Magaca Xeerka</u>

Xeerkan waxa lagu magacaabayaa Xeerka Ciidanka Ilaalidda Xeebaha Somaliland, Xeer Lr. 85/2017.

### <u>Qodobka 2aad</u>
### <u>Eray-bixin</u>

Haddii aan tuduca ay ku jiraan macno kale u yeelin, kalmadahan soo socdaa waxa loo macnaynayaa sidan:-

**Ciidan:** - Waxa loola jeedaa, Ciidanka Ilaalada Xeerbaha Jamhuuriyadda Somaliland.

**Xad-badeed**: - Waxa loola jeedaa xaduudaha badda ee Somaliland la leedahay dalalka ay dhinaca badda kale jaar ka tahay.

**Biyo-dhuleedka (continental zone[1]):** - Waxa loola jeedaa fogaanta dhinaca badda ee 12 Mile badeed ee Qaranka Somaliland Madax-bannaani buuxda u leeyahay.

[1] Eraygan Af Igriisiga ee ‘continental zone’ ma ahaa mid ku haboon ereyga Af Somaliga ee ‘biyo-dhuleedka’ (badda dhulkeeda) oo ah ‘<u>territorial sea’</u>, baaxaddeeduna aya tahay, sida ku xusan erey-

**Awooda sharciyeed:-** Waxa loola jeedaa xuduuda xad badeedka 1aad[2] ee ay gaadho awoodda sharci fulinned ee Qaranka Soomaliland;

**Xadduudda biyaha badda**[3] **:-** Waxa loola jeeddaa 12 mayl badeed oo ka bilaabma Xeebta Soomaliand;

**Wasiirka:-** Waxa loola jeedaa Waskiirka Wasaaradda Arimaha Gudaha

## Qodobka 3aad
## Ujeeddada Xeerka

Ujeeddada xeerkani waa in la dhiso Ciidan nidaamsan oo la isku haleyn karo oo xaqiijinaya in si waafaqsan shuruucda dalka kana hor imanayn shuruucda badaha iyo ammaanka xad badeedka iyo badweynta Caalamiga ah. Si ujeeddadaasi loo gaadhana, xeerkani waxa uu:

1. Unkay dhismaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha Soomaaliland;
2. Dhigayaa awoodaha, hawlaha iyo waajibaadyada Ciidanka Ilaalada Xeebaha.

## Qodobka 4aad
## Baaxadda Xeerka

Xeerkan waxa lagu dabaqayaa danbiyadda kala duwan ee ka dhaca xuduud biyoodka (bada) Somaliland[4].

## QAYBTA LABAAD
## AASAASKA CIIDANKA ILLAALADA XEEBAHA SOOMAALILAND

## Qodobka 5aad
## Aasaasidda Ciidanka Ilaalada Xeebaha

bixintan (iyo Qod. 4(1) ee Xeerka Kaluumeysiga Somaliland 2018, iyo Qod. 3 ee Cahdiga QM ee Badaha UNCLOS, iyo Qod. 4 ee Xeerka Badda Somaliyeed 1989, ilaa 12 meyl badeed .

[2] Ma cadda waxa loo jeedo 'badda 1aad'. Awooda sharciyeed (law enforcement powers) ee baddaha dalku leeyahay kuma ekka 'Biyo-dhuleedka' ama 'badda dhulkeeda' (Territorial Waters) oo ay awood buuxda, laakin waxay kalo awoodaas gaadhsiisantahay arrimaha qaarkood (sida arrimaha ku saabsan dekadaha , canshuuraha, socdaalka, ka- hortagidda wasakheynta iyo caafimaadka) Qaybta Xigta (Contiguous Zone) oo ah 24 meyl badeed marka laga soo titiyo xariiqada aasaasiga (baseline). Qaybta kale ee badda oo ah Qaybta Dhaqaalaha ee Gaarka ah (Exclusive Economic Zone) wuxu dalku u leeyahay awooda kale oo la xirrira xuquuqdeeda gaar ahaaneed ee aagaas. Awooda fulinta sharciyeed waxay ugu budantahay biyo-dhuleedka (amaba badda dalka), waxaana raacsan awoodaha badda Qaybta Xigta.

[3] Waa isla uun 'biyo-dhuleedka' ama 'badda dhulkeeda' (Territorial Sea) oo looma baahneyn in mar labaad erey-bixintan lagu daro.

[4] Marka laga reeby eryashada (hot pursuit) ee dhafsan 'bad dhulkeeda' eek u xusan Qod 9(3) ee Xeerkan, waxa awoodaha Ciidanka Xeerkani ku soo koobay, sida ku cad qodobkan 4aad iyo Qod. 9(1), fal dembiyeedada ka dhaca 'bada dhulkeeda' ama 'biyo-dhuleedka' (Territorial Sea). In kastoo kartida dalka ee xagga baddaha ay hadda aad u xaddidantahay, ma cadda cidda wax ka qabandoonta fal dambiyeeyada u baahan fulinta awood sharciyeed ee ka dhaca badda Qaybta Xigta (Contigious Zone). Qod, 33 ee Cahdiga QM ee Badaha UNCLOS ayaa dhigaya:

'1. Qaybta xigta badda dalka (territorial sea) … dalka xeebtaas wuxu isticmaalikara awoodda lagama maarmaanka u ah in:

a) lagaga hortago ku xadgudubka xeerarka ama xeer-nidaamiyaasha cashuuraha, maaliyada, socdaalka ama fayo-dhowrka ee gudaha dhulkeeda ama badda dhulkeeda (territorial sea);

b) la ciqaabo xadgudubyada xeerarka iyo xeer-nidaamiyaasha kor ku xusan ee lagu galay gudaha dhulkeeda ama ama badda dalkeeda (territorial sea).

2. Qaybta xigta kama badan karto 24 meyl badeed oo laga soo bilaabo xariiqada aasaasiga (baseline) ee laga soo qiyaaso baaxadda badda dulkeeda.'

1. Xeerka waxa lagu aasaasey Ciidanka Ilaalada Xeebaha Somaliland.

2. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu wuxuu xilkooda iyo waajibaadkooda u gudanayaa si waafaqsan Dastuurka Somaliland, xeerkan iyo shuruucda kale ee khuseeya hawlahooda.

**Qodobka 6aad**
**Shakhsiyadda Qaanuun ee Ciidanka Ilaalada Xeebaha**

1. Ciidanka Ilaalada Xeebaha Soomaliland waxa uu noqonyaa hay'ad dawladdeed oo leh shakhsiyad qaanuuni ah, yeelanaysana xeer hoosaadyo iyo qaab dhismeed u gaar ah.

2. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu hoostagaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waxaana uu yeelanayaa madaxbanaanidiisa maamul, miisaaniyadeed iyo gudasho hawleed.

**Qodobka 7aad**
**Astaanta Ciidanka Ilaaladda Xeebaha**

1. Ciidanka Ilaalada Xeebaha Somaliland waxa uu yeelanayaa astaan u gaar ah.

2. Astaanta Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waa qoraal wareegsan oo uu ku dhexyaal:-
   b. Galaydh badeed,
   t. baroosin ay ku xardhantahay laba faras badeed oo dhinacyada ka kala haysta kuna dhex qorantahay "Ciidanka ilaalada xeebuhu"
   j. laba caleemood oo dhinacyada kaga xardhan oo midabkooda guud hurud yahay.

3. Astaanta Ciidanka Ilaalada Xeebaha Jamhuuriyada Somaliland cidii isticmaasha ee ogolaansho ka haysan taliska ciidanka Ilaalada Xeebaha waxay mutaysanaysaa ciqaab ganaax ah.

**Qodobka 8aad**
**Xarrunta Taliska Iyo Xarun Goboleedyo**

1. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu yeelanayaa Xarun talis iyo Xarumo Goboleedyo .

2. Ciidanka Ilaalada xeebuhu waa in uu aasaaso oo yeesho xarun taliska guud goboleedyo iyo baro ilaalo oo ku baahsan Xeebaha Soomaliland si uu u sugo ammaanka dadka, hantida iyo fayo dhawrka badda.

3. Dhismaha Xarunta taliska, xarun goboleedyada, baraha ilaalada iyo nidaamkooda maamul waxa lagu qeexayaa xeer nidaamiye ka dheegma xeeran.

**QAYBTA SADDEXAAD**
**HAWLAHA, WAAJIBAADYADA IYO AWOODAHA CIIDANKA ILAALADA XEEBAHA**

**Qodobka 9aad**
**Xadka Awoodda Fulineed**

1. Awoodaha fulineed ee Ciidanka Ilaalada Xeebahu waxay ay ku koobantahay gudaha xad baddeedka Soomaliland.

2. Awoodaha sharci fulineed ee Ciidanka Ilaalada Xeebaha Soomaliland waxa kale oo lagu fulin karaa gaadiidka badda goobta uu doono ha joogo ee sita calanka Soomaliland si waafaqsan Shuruucda dalka u yaal.

3. Awoodaha fulineed ee Ciidanka Ilaalada Xeebaha Somaliland waxay wax ka soo qaban karaan ama eryasho ka samayn karaan (Hot pursuit)[5] meelaha ka baxsan xuduuda dalka sida badweynta ( high sea) ee xeerarka caalamiga ahi ogol yihin.

## Qodobka 10aad
## Waajibaadka

Ciidanka Ilaalada Xeebaha Soomaliland waxa uu si waafaqsan xeerarka dalka u gudanayaa waajibaadyadiisa, kuwaasi oo ay ka mid yihiin kuwan hoos ku xusan:-

1. Ku fulinta Xeerarka Soomaaliland nidaamiyayaasha gudaha xad-badeedyada Somaliland.
2. Fulinta xeerarka iyo xeer hoosaadyada khuseeya ilaalinta nabadagelyada iyo bed-qabka khayraadka iyo deegaanka badaha Somaliland;
3. Gudashada waajibaadyada ku cad Qodobka 8aad ee Xeerka La-dagaalanka Budhcad badeedka ee Soomaaliland, Xeer Lamb 52/2012;
4. Ilaalinta amaanka gaadiidka maraya gudaha biyo badeedyada soomaaliland; iyo xaqiijinta in aan fal dambi badeed lagula kicin ama khatar amni darro oo kale la gaadhsiinin noolaha iyo hantida iyo waliba hawlaha horumarineed, dayac tir iyo wax ka qabashada qalabka loo adeegsado bad marida;
5. ka hortagista in qof, qalab ama shaykale u soo galo ama uu uga baxo gudaha Soomaaliland si aan sharci ahayn, ama iyadoon la bixinin khidmad, cashuur ama takaaliif kale oo sharci ah, ama iyadoon la fulin shuruud kale oo sharci waajibiyay ilaalinta;
6. U gurmashada shilalka ka dhaca gudaha xad bedeedka dalka iyo baadhistooda, Baadhista gudaha xad baddeedka Soomaaliland laga baadhayo shil ama dhimasho ka dhacday badda ama hawada, baadi- goobka ama badbaadinta dadka iyo weel-badeedyada ku wax-yeelooba.
7. Yareynta ama ka hor tagista in Deegaanka ay soo gaadho wax yeello ba'an oo ka dhalata wasakhayn (spillage), shill, ku xad gudub xeer ama xeer hoosaad, ama khatar kale oo deegaaneed;
8. Xaqiijinta dhawrsanaanta khayraadka iyo deegaanka Badda;
9. Kala shaqaynta Wasaarada ay khusayso Kaluumaysiga iyo khayraadka badda Somaliland ka hortagista iyo suulinta xad-gudubyada ka dhan ka ah Xeerarka iyo xeer-nidaamiyayaasha Kaluumaysiga; sida uu dhigayo qodobka 12aad ee xeerkani.
10. Kala shaqaynta Wasaarada maaliyada iyo maamulka dekadaha qabashada weel-badeedyada ku gefa shuruucda maaliyada iyo kastamada iyo amniga dekadaha dalka.
11. Fulinta hawlaha danta guud ee kale ee ay Wasiirka iyo Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebahu ay u gartaan in Ciidanka Ilaalada Xeebaha ay ugu muuqato in ay ku jirto dan qaran.
12. Marka ay jirto xaalad dagaal ama xaalad deg-deg ah waxa waajib ku ah Ciidanka Ilaalada Xeebaha in uu ka qayb qaato difaaca Qaranka oo uu la shaqeeyo Ciidamada Qalabka Sida ee hawshaasi ku foogan.

## Qodobka 11aad
## Awoodaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha

1. Awoodaha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa ay gaadhsiisan tahay xudduud badeedyada Jamhuuriyada Somaliland, si waafaqsan Xeerkan, iyo Xeerarka kale ee badda ee ay ka mid yihiin xeerka kalluumaysiga, xeerarka maaliyada iyo dhamaan xeerarka kale ee khuseeya, isaga oo kala shaqaynaya hay'adaha kale ee Qaranka.

2. Ciidanka Ilaalada Xeebaha waxa uu yeelanayaa awoodahan soo socda:-

b) In uu joojiyo , ka hortago, isla markaana baadho gaadiidka badda ee sabab fiican (good

[5] Xaqqa eryashada ama dabagalka deg deg ah (hot pursuit) iyo shruudihiisa waxay ku xusan yihiin Qod. 111 (Right to Hot Pursuit) ee Cahdiga QM ee Badaha UNCLOS.

reason) loo hayo inay gacanta kula jiraan fal-dambiyeedyada iyagoo ku sugan gudaha xuduudaha badaha somaliland.
t) in uu xidho, hayo, wax su'aalo oo uu wareysto dadka lagu tuhmo in ay faldambiyeedyo galeen;
j) in uu ururiyo caddeymo iyo wareysiyada laga qaaday ama ay bixiyaan dadka la xidhay ee ku ku jira gacantooda iyo markhaatiyadaba; isla markaana ku wareejiyo xeer-ilaalinta Qaranka u leh si dawladdu ugu oogto si waafaqsan xeerarka dalka.
x) In uu joojiyo oo baadhis ku sameeyo gaaddidka badda;
Kh) In uu Qabto walxaha iyo hantida khuseeya fal- dembiyeedyo la galey (dhacay);
d) In uu dembi baadhis ku sameeyo dhacdooyinka dambiyada;
r) In uu wax su'aalo oo uu waraysto dadka eedaysanayaasha ah ama xidhan ama la hayo ee gacantooda ku jira;
s) In uu ka hortagto in xad biyoodka Soomallailnd lagu soo galo sifo aan waafaqsanayn sharciga ama xadgudub ku ah shuruucda caalamiga ah ama xeerarka Qaranka.
Sh) Waa inay ciidanka illaalada xeebuhu ka hubiyaan maraakiibta Dekadda ku soo xidhanaysa inay sitaan hub sugaana sida loo xafidayo mudada uu weelku joogo Dekada/biyaha Somaliland;
c) In eedaysanaha ay soo qabtaan Ciidanka illaalada Xeebuhu ay geeyaan saldhiga boolis ee ugu dhaw.
q) In ay u gudbiyaan eedaha loo haysto eedaysanaha & markhaatiyaashoodaba ciidanka booliska ee degmada & C.I.D ku waas oo u gudbin doona xeer illaalinta.

3. Ciidanka Ilaalada Xeebahu waa in uu u fuliyo awoodahiisaas si waafaqsan Dastuurka Soomaaliland iyo Shuruucda kale ee ay tahay in la dabaqo.

## Qodobka 12aad
## Wada shaqaynta Ciidanka Ilaalada xeebaha iyo Wasaaradda u xilsaaran Arrimaha Kaluumaysiga iyo Khayraadka Badda

1. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu wadashaqayn dhaw la yeelanayaa Wasaaradda Kaluumaysiga[6].

2. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu kala shaqaynayaa Wasaaradda Kaluumaysiga iyo Khayraadka Badda:-
b) Ka hortaga kaluumaysiga sharci darrada ah;
t) Ilaalinta kaluumaysatada ku kaluumaysanaya ruqsad sharci ah oo Wasaaradda Kaluumaysigu bixisay;
j) Ilaalinta iyo ka hortaga waxyeelaynta xeebaha Somaliland iyo khayraadka ku duugan;
x) Soo qabashada, haynta iyo sharci horgaynta doonyaha iyo shaqaalaha saaran ee ku xadgudba sharciga kaluumaysiga Somaliland;
Kh) Ilaalinta Xarumaha Wasaaradda Kaluumaysiga ee xeebaha ku yaal iyo hantida dhextaalba;
d) Hubinta iyo xaqiijinta ansaxnimada ruqsadaha kaluumaysi ee doonyaha iyo maraakiibta badda Somaliland ku jirraa wataan;
r) Hubinta aqoonsiga doonyaha iyo maraakiibta ka kaluumaysanaya badda Somaliland;
s) Ka hortaga wasakhaynta badda.

## Qodobka 13aad
## Abuurida Igaadhsiinta Ciidanka Ilaalada Xeebaha

[6] Qod. 8aad ee Xeerka Kalluumaysiga- Xeer Lr. 84/2018:
'8. Ilaalinta Khayraadka Badda
Wasaaradda iyo ciidanka ilaalada Xeebaha ayaa ka mas'uul ah ilaalinta amniga xeebaha Somaliland iyo kohortaga kallumaysiga sharci darada biyaha dhul badeedka Somaliland.'

1) Ciidanka ilaalada xebaha somaliland waa inuu abuuro oo hirgaliyo xarumaha isgaadhsiinta (VHF marine bands) ee loogu talo galay xidhiidhka xarumaha iyo baraha ciidanka, xidhiidhka gaadiidka ganacsi ee rayidka sida maraakibta iyo doonyaha, iyo xidhiidhka ciidanka iyo hay'adaha kal ee qaranka.

2) Xarumaha isgaadhsiinta ee ku xusan faqrada sare ee qodobkan waxa uu ciidanku u adeegsanayaa

- b) Xidhiidhka gaadiidka rayidka ah ee soo gala biyo badeedyada somaliland iyo kuwa ka baxaya.
- t) Xidhiidhka isdhaafka si nabada ee gaadiidka bada sida maraakiibta iyo doonyaha ee gudaha biyo badeedka somaliland iyo biyaha caalamiga ahba.
- j) Xidhiidhka warbixinaha shilalka gaadiidka badda ee ka dhaca gudaha biyo badeedka Somaliland.
- x) Xidhiidhka khataraha ka dhaca bada iyo xidhiidhka Goobidda iyo Samata bixinta iyo
- Kh) Dhamaan xidhiidhada kale ee la xidhiidha hawlaha shaqo ee ciidanka ilaalada xeebaha Somaliland.

3) Ciidanka ilaalada xeebuhu waxa kale oo uu abuurayaa xarunta kaydka xogaha dhaq-dhaqaaqyada iyo warbixinaha gaadiidka bada oo electronic ah ee biyo badeedyada somaliland.

## QAYBTA AFRAAD QAABDHISMEEDKA CIIDANKA ILAALADA XEEBAHA

### Qodobka 14aad
### Awoodaha iyo doorka Madaxweynaha

Madaxweynuhu waxa uu ku leeyahay Ciidanka Ilaalada Xeebaha awoodaha ku xusan Qodobka 90aad Faqraddisa (4aad) ee Dastuurka[7], waxa uuna:

- b. Isagoo ka duulaya talo bixinta Wasiirka Arimaha Gudaha, magacaabaa, xilkana ka qaadaa Taliyaha iyo taliye ku xigeenka Ciidanka Ilaalada Xeebaha;
- t. Si sharciga waafaqsan u bixiyaa darajooyin, abaal marin iyo bilado ay mutaystaan Saraakiisha Ciidanka Ilaalada xeebuhu;
- j. Fuliyaa hawlaha iyo waajibaadyada kale ee xeerkan ama xeer kale u awood siiyey.

### Qodobka 15aad
### Awoodaha iyo Doorka Wasiirka Arimaha Gudaha

1. Wasiirka Arimaha Guduhu isagoo meteleya Wassaradda Arimaha Gudaha waxa uu ku leeyahay Ciidanka Ilaaalada Xeebaha doorka iyo awoodahan soo socda:

- b. Waxa uu madaxweynaha kala taliyaa magaacibista iyo shaqo ka eryista Taliyaha iyo Kuxigeenka Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha;
- t. Waxa uu korka kala socdaa hawlaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha;

[7] Faqradan 4aad ee Qod. 90aad ee Distoorka Qaranka wuxuu dhigaya awoodaha Madaxweynaha ee '*Hoggaaminta ciidamada Qaranka maadaama uu yahay Tahyaha Guud (Commander-in-Chief*)'. Awoodani waxaan qabaa in ay tahay mid ku saabsan Ciidanka Qaranka ee militariga ah eek u xusan qodobka u gaarka ah ee 123aad ee Distoorka. Dalalka diimuqraadiga ma dhacdo in Madaweynuhu uu noqdo Taliyaga Guud ee ciidamada fuliiya sharciyadda sida booliska, asluubta iyo xeebo-ilaalyasha, oo loo arku in ay yhiin ciidamo in kastoo ay hudbeysan yihiin aan militrari aheyn. Ciidanka ilaaladu kuma xusna Distoorka, laakin waa ciidan u xilsaraan fulinta xeerarka dalka (law enforcement). Sida aan kaga faaloondoono Somaliland xeerarkeedii ku saabsanaa booliska iyo asluubto shuqul kuma la hayn militarinimmo, waxaana inagu soo kordhiyey arrimihan isutagii Somalia iyo gaar ahaan xukuumadii militariga ee kala taliska ee dhacday. Qabyo qoraaladii xeer ee hore oo ku saasanaa ciidamada Booliska iyo Ilaalada Xeeba waxay soo jeediyeen in ciidamaasi yihin ciidamo aan military ahayn.

j. Wuxuu Golaha Wasiirada u gudbiyaa warbixin sannadeedka waxqabadka Ciidanka Ilaalada Xeebaha;
x. Waxa uu soo saaraa wareegtooyin iyo amaro maamul ee lagama maarmaanka u ah dhaqan galinta Xeerkan;
kh. Waxa uu sanad miisaaniyadeedka Ciidanka Ilaalada Xeebaha u gudbiyaa islamarkaana ka hor difaacaa Golaha Wasiirada;
d. Waxa uu Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha siiyaa talo bixinno iyo tilmaamo ku aadan fulinta waajibaadyada/hawlaha Ilaalada Xeebaha.

2. Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxay kaloo u xilsaaran tahay tayaynta, dib u habaynta iyo horumarinta Ciidanka Ilaalada Xeebaha.

## Qodobka 16aad
## Qaab dhismeedka Ciidanka Ilaalada Xeebaha

1. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu yeelanayaa qaab dhismeedkan soo socda:
   b) Taliska guud oo ka kooban Taliyaha iyo Taliye Xigeenka Ciidanka Ilaalada Xeebaha.
   t) Waaxda Baadhista Dembiyadda Badda
   j) Waaxda Hirgelinta Shuruucda Badda iyo la shaqaynta hay'adaha kale ee qaranka;
   x) Waaxda isgaadhsiinta iyo Mushaaxidda Badda; Kh) Waaxda Farsamada iyo Taakulaynta.

2. Ciidanku Ilaalada Xeebuhu waxa kale oo uu yeelan karaa Waaxyo kale oo ku haboon shaqadooda.

3. Shaqooyinka Waaxyaha kala duwan ee Ciidanka Ilaalada Xeebaha waxa nidaamin doona xeer nidaamiyayaasha xeerkan ka dheegan.

## Qodobka 17aad
## Qaabdhismeedka Darajada Ciidanka Ilaalada Xeebaha

Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu yeelanayaa darajooyinka soo socda:-
1. Saraakiil sare[8]:-
   b. Admiral Guud
   t. Admiral Gaas
   j. Admiral/ Sareeye guuto
   x. Gaashaanle Sare
   Kh. Gaashaanle dhexe
   d. Gaashaanle
2. Saraakiil Hoose
   b) Dhamme
   t) Laba xiddigle
   j) Xiddigle
3. Saraakiil xigeeno
   b) saddex xadhigle
   t) laba xadhigle
   j) xadhigle
4. Askari
   b) Saddex Alifle
   t) laba alifle
   j) Alifle

[8] Darajoonkan sare ee 3da oo ah kuwa ciidamda badda moye, inta kale waa daroojin militariga oo Booliska iyo Asluubta Somaliland loogu beddellay kuwoodii hore bilowgii 1962kii ka dib isku biirkii Somaliland iyo Somaliland.

x) Dable
Kh) Dable dhiman

**Qodob 18aad**
**Dirayska Ciidanka Ilaalada Xeebaha**

Wuxu Noqonayaa Sidan soo socota:-
1. Tuute saxaraawi ah iyo kabihiisa ( desert uniform)
2. Labis cad oo dhamaystiran iyo kabihiisa ( Stander white uniform)
3. Labis Madow ( stander black uniform)
4. Saraakiisha iyo saraakiil xigeenku waxay qaadanayaan Koofiyad cad (White Cap).

**Qodobka 19aad**
**Taliyaha Ciidanka Ilaalada xeebaha**

1. Ciidanka Ilaalada Xeebaha waxa hoggaaminaya Taliye.

2. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebahu waxa uu yeelanayaa darajada iyo mushaar la mid ah ka darajada adhmiraal/guuto.

3. Taliyuha waxa, si waafaqsan Qodobka 90aad farqadiisa 4aad ee Dastuurka, u magacaabaya Madaxweynaha oo ka duulaya aqoonta iyo waayo aragnimada cidda la magacaabayo iyo talo bixinta Wasiirka Arimaha Gudaha;

4. Qofka loo magacaabayo Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waa in uu buuxiyo shuruudahan soo socda:
b) In uu ka mid yahay saraakiisha sare ee Ciidanka Ilaalada xeebta; iyo
t)In uu haysto degree ama kuulliyada hoggaaminta, ama degree ama diploma kuulliyad abbaanduule uu ka qaatey degree ugu hoosayn Kullayadda Culuun Bad.

5. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu leeyahay waajibaadyadan soo socda:
b) In uu dabbaqo Dastuurka iyo sharciga;
t) In uu Hago, isku dubba rido oo uu kormeero dhammaanba hawlaha Ciidanka Ilaalda Xeebta;
j) In uu meel mariyo xeererka, siyaasadaha iyo qorsheyaasha, xeer nidaamada khuseeya ammaanka badda, iyo wareegtooyinka ay soo saaraan Wasiirka iyo Madaxweynuhu ;
x) Waxa uu warbixino ka siiyaa Madaxweynaha iyo Wasiirka Arimaha Gudaha hawlaha iyo wax qabadka Ciidanka Ilaalada Xeebta;
Kh) Waxa uu diyaariyaa warbixin lix biloodle ah oo khusaysa hawlaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha oo loo gudbunayo wasiirka Arimaha Gudaha; sidoo kalena waxa uu diyaarinayaa warbixin sannadle ah madaxweynaha loo bandhigo oo khusaysa wax qabadka Ciidanka Ilaalada Xeebaha;
d) Waxa uu xidhiidhiyaa oo kala shaqeeyaa hawlaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha hay'adaha iyo wakaaladaha ee ay hawl wadaaga iyo wadashaqaynta leeyihiin;
r) waxa uu masuul ka yahay tayeynta iyo horumarinta Ciidanka Ilaalada Xeebaha;
s) waxa uu diyaariyaa sannad miisaaniyadeedka Ciidanka Ilaalada Xeebaha, una gudbiyaa Wasiirka Arimaha Gudaha oo uu sidoo kalena warbixin saddex biloodle ah ka diyaariyaa isticmaalka miisaaniyadda siiyaana Wasiirka Arimaha Gudaha;
sh) Waxa kale oo uu fulinayaa hawlaha kale ee sharcigu u igmado.

c)[9] Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu leeyahay awoodahan soo socda:

[9] Xarafkan 'c', marka la eegu weedhaha lambarsan ee ka hooseeya, waxa uu u egyahay in uu yahay faqrada 6ad ee Qodobkan, 5ta weedh ee hoos yimaadaana ay yihiin xarafya b, t, j, x iyo kh. Oo ku saaban

6. Waxa uu soo jeediyaa una gudbiyaa Madaxweynaha si uu u ansixiyo dalacsiinta iyo derejo dhimista Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebaha;
7. Waxa uu soo jeediyaa dib u eegis lagu sameeyo Qaab dhismeedka Ciidanka Ilaalada Xeebaha una bandhigaa Wasiirka Arimaha Gudaha si uu u ansixiyo;
8. Isagoo ka duulaya Qaab dhismeedka ansaxan, ayuu ansixiyaa shaqaaleynta xubno cusub ee looqorayo Ciidanka Ilaalada Xeebaha;
9. Waxa uu galayaa heshiisyo waafaqsan xilka/ awoodda Ciidanka Ilaalada xeebaha iyo sifaha uu qeexayo sharcigu;
10. Waxa uu soo saarayaa awaamiir maamul iyo hab raacyo ( standard operating procedures) ku aadan hawl gudashada iyo qaab dhismeedka Ciidanka Ilaalada Xeebaha.

## Qodobka 20aad
## Ku xigeeenka Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha

1. Ku xigeenka Taliyaha Ciidanka Ilaalada xeebuhu waxa uu leeyahay Darajo ( Naval Captain) ama darajo u dhiganta, waana sarkaalka labaad ee ugu sareeya Ciidanka Ilaalada Xeebaha.

2. Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland ayaa magacaabaya Ku xigeenka Taliyaha kadib marka uu helo talada Wasiirka Arimaha Gudaha;

3. Ku xigeenka Taliyuhu waxa uu gudanayaa waajibaadyada Taliyaha, marka uu taliyuhu maqan yahay;

4. Ku xigeenka Taliyuhu waxa uu gudanayaa waajibaadyada ama hawlaha kale ee uu Taliyuhu u igmado;

5. Ku xigeenka Taliyuhu waxa uu hoostagaa oo warbixinaha siinayaa Taliyaha.

## Qodobka 21aad
## Shaqo kasaaris/eryidda Taliyaha ama Ku xigeenka Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha

1. Madaxweynaha isagoo kalatashanaya Wasiirka Arimiaha Gudaha waxa uu awood u leeyahay in uu Taliyaha iyo/ama Taliye Ku-xigeenka ka fadhiisiyo shaqada, hadii:
   b. Uu soo gudbisto codsi shaqo ka fadhiisi.
   t. Uu muddo lix bilood ah kari waayo gudashada waajibaad kiisa sababo caafimaad dartood.
   j. Uu gudan waayo hawlaha iyo waajibaadyada uu u xil saran yahay;
   x. lagu helo in uu galey/gashey fal anshax darro culus iyada oo la raacayo xeerka anshaxa Ciidanka.
   Kh. Go’aan maxkamdeed oo kama dambays ahi ku xukunto fal dambiyeed .

2. Marka la eryo Taliyaha ama Taliye Ku xigeenka, haddii aan si dhakhso ah loo magacaabin cid bedesha, madaxwaynahu isagoo la tashanaya Wasiirka Arimaha Gudaha waa in uu si ku meel gaadh ah sarkaal kale ugu dhiibo booska la banneeyey.

## QAYBTA SHANAAD

## XULISTA IYO TABOBARISTA SARAAKIISHA CIIDANKA ILAALADA XEEBAHA

## Qodobka 22aad

awoodaha Taliyaha Ciidanka.

**Qiimaynta Aqoonta Iyo Tabobarka Saraakiisha
Ciidanka Ilaalada Xeebaha**

Taliyuhu isaga oo la kaashanaya Wasiirka Arimaha Gudaha wuxuu masuul ka yahay si sharcigan waafaqsan qiimaynta aqoonta asaasiga ah qofka la shaqeynaya iyo in uu qorsheeyo tababarada waajibka ah ee loo baahan yahay in la siiyo xubnaha ciidanka ilaalada xeebaha inta ay ku jiraan tijaabada iyo kor u qaadista aqoonta Saraakiisha.

**Qodobka 23aad
shuruudaha xulashada saraakiisha, saraakiil xigeenka
iyo askarta ciidanka Ilaalada Xeebaha**

b. Saraakiisha
- b) Qofka sarkaal loo qaadanayaa waa inuu haysto ugu yaraan derejada kowaad ee shahaadad jaamacadda ama kuliyadaha farsamada
- t) Waxaa laga qaadayaa imtixaan aqoonta guud, xisaabta iyo juqraafiga
- j) Tabaridda saraakiisha, aqoon ku saabsan nabadgelyada badda
- x) Siinta casharo ku saabsan dabbaasha
- Kh) Marka ardaygii ka soo qalin jabiyey jaamacaddu dhammaysto tababar lix bilood ah wuxu qaadanayaa hal xiddig

c. Xulashada sarkaal xigeenka
- b. Qof ka soo baxay dugisga sare
- t. Imtixaan aqoonta guud
- j. Tababar saddex bilood oo ku saabsan aqoonta badda
- x. Ku tababaraidda dabbaasha iyo aqoonta badda
- Kh. Derejada hal xadhig baa lagu qaadanayaa saddexda bilood ka dib.

y? *d*.. Qaadashada Askariga (Dable)
- b) Inuu yaqaan akhriska iyo qorista Af Soomaaliga
- t) Tababar saddex bilood oo ku saabsan dabbaasha iyo aqoonta badda.

**Qodobka 24aad
Nidaamka Loo Soo Xulayo Saraakiisha Ciidanka
Ilaalada Xeebta**

1. Nidaamka loo marayo xulista iyo imtixaan ka qaadista cidda ka mid noqonaysa saraakiisha Ciidanka Ilaalada xeebuhu waxa uu noqonyaa sidan:
   - b. Imtixaan aqoon guud ah oo noqonaya af ahaan iyo qoraal ahaan;
   - t. In la hubiyo caafimaad kiisa jidheed iyo in uu dabaasha yaqaan;
   - j. in la mariyo baadhitaan caafimaad jidheed iyo maskaxeed;
   - x. wareysi iyo in la soo baadho taariikh nololeedkiisa.

2. Natiijada ka soo baxda baadhitaanada iyo imtixaannadaasi ayaa lagu salaynayaa go'aan ka gaadhista in cidda la qaadenayaa ay buuxisay shuruudihii aasaasiga ahaa ee looga baahnaa.

3. Nidaamka xulashadu waa in u ku salaysan yahay mabaa diida faquuq la'aanta, is dheelitirnaanta gobolada iyo ka qayb galka lammaanaha.

**Qodobka 25aad
Tabobarka Aasaasiga ah ee Ciidanka Ilaalada Xeebaha**

1. Cida u taagan in uu ku biiro saraakiisha Ciidanka Ilaalada xeebaha, waxa waajib ku ah inuu qaato tabobar aasaasi ah oo waafaqsan dhammaan tayada iyo shuruudaha ku cad Qodobka 18 aad ee Xeerkan.

2. Cidda qaadata ee dhameysata tababarkaa aasaasiga ah ayaa kamid noqonkarta Ciidanka Ilaalada Xeebaha kaas oo awood u leh fulinta hawlaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha.

## QAYBTA LIXAAD
## NIDAAMKA ANSHAX MARINTA

### Qodobka 26aad
### Nidaamka Anshax Marinta Saraakiisha Haysa Xil Sare oo Magacaabis ah

1. Cabashooyinka khuseeya fal anshax darro fufud ama culus ee laga soo gudbiyo Taliyaha iyo Taliye Xigeenka waxa baadhaya Guddi Anshax oo uu magacaabayo Madaxweynuhu.

2. Guddigu waxa uu hubinayaa in uu dhacay fal anshax-darro ahi, waxaana uu sidoo kale u gudbinayaa Madaxweynaha talo soo jeedin ku aadan talaabada anshax-marineed ee ay tahay in laga qaado cidda ay khusayso

3. Madaxweynaha ayaa, isagoo tixgalinaya talo bixinta guddiga Anshaxa, go'aan ka gaadhaya talaabada an shaxmarineed ee la saarayo cidda ay khusayso.

4. Hadii falka anshax-daro uu noqdo mid faldanbiyeed ah, gudiga iyo madaxweynaha waxa waajib ku ah iney ku wargaliyaan xafiiska Xeer-illaalinta Guud ee Ciidamada.

### Qodobka 27aad
### Nidaamka Anshax Marineed Ee Saraakiisha Iyo Shaqaalaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha.

1. Cabashooyinka khuseeya fal anshax darro fufud ama culus ee laga soo gudbiyo sarkiisha Ciidanka Ilaalada Xeebaha, waxa baadhaya Guddiga Anshax ee uu umagacaabay Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu si waafaqsan nidaamka uu dhigayo Xeer hoosaadku .

2. Guddigu waxa uu hubinayaa in uu dhacay fal anshax-darro ahi, waxaana uu sidoo kale u gudbinayaa Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha talo soo jeedin ku aadan talaabada anshax-marineed ee ay tahay in laga qaado cidda ay khusayso

3. Taliyuhu, isagoo tixgalinaya talo bixinta guddiga Anshaxa, ayuu go'aan ka gaadhaya talaabada anshaxmarineed ee la saarayo cidda ay khusayso.

4. In la sameeyo labo gudi anshax oo kala sareeya oo loo kala rafcaan garaayo, balse aaney ahayn in maxkamudduhu arimaha anshaxa ee ciidamada ay door ku yeeshaan.

### Qodobka 28aad
### Fal Anshax Darro Iyo Nidaamka Anshax Marinta

Falka noqonaya fal anshax daro, talaabooyinka anshax marineed ee la mutaysnayo, nidaamka gudbinta cabasho iyo baadhista fal anshax darro, magacaabista guddiga Anshax iyo nidaamka go'aan qaadasho waxa qeexi doona Xeer hoosaad gaar aha.

### Qodobka 29aad
### Dhimashada, Dhaawaca Iyo Naafada Xubnaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha

1. Xubinta ka mid ah ciidanka ilaalada xeebaha ee lagu dilo isaga oo waajibaadkiisa ciidan gudanaya ama lagu dilo aargoosi ka dhashay waajibaadkiisa ciidan ee uu gudanayey waxaa magtiisa ama magteeda bixinaya dawlada, waxaana la horgaynayaa cadaalada.

2. Xubinta Ciiddanka ilaalada xeebaha ee lagu dilo hawl-gal sharciga waafaqsan waxaa dhibane ka ah Qaranka Jamhuuriyada Somaliland, oo ay waajib ku tahay in uu bixiyo magtiisa ama dhaawaciisaba. Ciddii falkaas gaysatayna meelkastaba ha tagtee qaranka ayaa ka goosanaya, soona qabsanaya, sharcigana hor keeenaya.

3. Xubin kasta oo ciidanka ilaalada xeebaha ah oo lagu dhaawaco ama ku dhaawacanta ama ku naafawda ama waxyeelo soo gaadho iyada oo waajibaad Ciidan gudanaysa wuxuu ama waxay dawlada xaq ugu leeyahay daawayntiisa iyo xannaanayntiisaba.

4. Naafada iyo dhaawaca xubnaha ciidanka ilaalada xeebaha waxaa lagu nidaaminyaa xeer-nidaamiyaha ciidanka ilaalada xeebaha Somaliland.

**QAYBTA TODDOBAAD**
**XIDHIIDHKA SHAQAALENIMO**

**Qodobka 30aad**
**Shaqaaleynta Shaqaalaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha**

Ciidanka laalada Xeebuhu waxa uu shaqaalysanaya laba qaybood oo shaqaale ah:
1. Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebaha, oo loo dhaarinayo loona awood siinayo fulinta awoodaha iyo waajibaad yada Ilaalada Xeebaha; iyo
2. Shaqaale rayid ah oo loo shaqaaleynayo fulinta arimaha maamulka iyo adeegyada taageero, balse aan lahayn awood ay ku fuliyaan hawlaha iyo waajibaad yada ilaalada Xeebaha.

**Qodobka 31aad**
**Mushaharka Iyo Magdhawga Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebaha**

1. Dajinta nidaamka dhaqaalaha Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebtu waa in uu ka duulayo xaaladaha gaar ka ah ee ay ku gutaan waajibaad yadooda. Mushaarka aasaasiga aha ee Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waa in uu kala duwanaado iyadoo lagu salaynayo darajada iyo mudada shaqo iyo wixii la mid ah .( Tanna waxa go'aaminaya Digreeto uu soo saarayo Wasiirka Arimaha Gudaha is-lamarkaana tix galin la siinayo mushaarka ay qaataan Booliisku.

2. ka sakow Mushaharka aasaasiga ah, Saraakiisha ciidanka Ilaalada Xeebtu waxa sida sharciga ah loo siin karaa kab mushahar, gunnooyin iyo faa'iidooyin kale. Kharashaadkan kab ka ah bixintooda waxa lagu salayn karaa xaaladda adag ee goobta shaqada , shaqo dheeri ah, (shift differential) , shaqaynta maal maha iidaha ama fasaxa ah, hawl gaar ah oo la qabto iyo xirfad gaar ah.

3. Go'aaminta iyo bixinta Mushaharka aasaasiga ah iyo amarka bixinta kharshaadka kab ka ahi waa in la waafajiyo nidaamka iyo shuruudaha ku qeexan xeeraka iyo Xeer hoosadyada khuseeya arimahaasi. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu ku dari karaa Soo jeedinta Miisaaniyad sannadeedka Ciidanka Ilaalada xeebaha miisaaniyadda loogu baahan yahay bixinta kharashaadka kab ka ah ee xeer jideeyey una gudbinayaa si ay u ansixiyaan Wasiirka Arimaha Gudaha Jamhuuriyada Somaliland .

**Qodobka 32aad**
**Iskhilaaf Daneed**

1. Sarkaalka Ciidanka Ilaalada xeebuhu waa in aanuu aqbalin qabashada xil ama waajibaad, ama ka qayb qaadan hawl ama shaqo ku abuuri karta is khilaaf- danned hawlaha iyo waajibaadyada rasmiga ah ee Ciidanka Ilaalada Xeebaha. Xilalka iyo hawlaha ama shaqooyinka loo qaadanayo iskhliaaf daneed waxa ka mid ah kuwan soo socda:

b. In loo magacaabo ama loo doorto xafiis dawladeed ama jago kale oo xukuumadeed;
t. u ololaynta doorashooyinka ama ka mid noqdo xisbi siyaasadeed;
j. ka shaqaaloobidda, ama ka qayb qaadashada shaqo ama hawl ganacsi oo uu mushaar ama faa'iido dhaqaale lagu helayo, iyadoo aan Taliyaha fasax laga haysan;
x. War murtiyeed ama faalo khusaysa shaqo kamid ah hawlaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha oo si caam ah loo baahiyo iyadoo aan fasax cad laga haysan mas'uulka awood sharci u leh bixinta fasaxaasi.

## Qodobka 33aad
## Dalacsiinta, Derejo Dhimista , Shaqo Ka Eriga Iyo Is Casilista Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebaha

Xeer hoosaad gaar ah ayaa qeexidoona Shuruudaha iyo nidaamka loo raacayo dalacaada, dhimis, shaqo ka eriga iyo is casilista saraakiisha iyo shaqaalaha rayidka ah ee Ciidanka Ilaalada Xeebaha.

## Qodobka 34aad
## Mas'uuliyadda Dambi

Sida ay dhigayaan Qodobada 33, 34, 35, 36, 37 iyo 38 ee Xeerka Ciqaabta Guud, saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebaha laguma eedeynayo fal dambiyeed ka dhashay fulinta amar sharciga waafaqsan ama fulinta xeer ama is-difaac.

## Qodobka 35aad
## Mas'uuliyad Madani

1. Sarkaalka ka tirsan Ciidanka Ilaalada Xeebaha waa in uu ku war galiyo mas'uulkiisa wixii uu khasaare ama daawac ah ee uu cid u gaysto isagoo gudanaya waajibaad shaqo

2. Si waafaqsan xeerarka dalka, Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxa ku waajiba ah inay magdhawdo khasaaraha ama dhaawaca cid (natural and legal persons) soo gaadhay ee ka dhasha talaabo uu qaaday sarkaal Ciidanka Ilaalada Xeebaha ah oo gudanaya ama ku guda jira gudashada waajibaad shaqo.

## Qodobka 36aad
## Fayl Gaar Ah

1. Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waa in uu lahaado fayl/gal u gaar ah oo la samaynayo marka la shaqaaleynayo. Faylkan waxa lagalinayaa xogta gaarka ah ee khusaysa shaqaalenimada Ciidanka Ilaalada Xeebaha sida jagada uu hayo/hayso, nooca hawlaha loo igmaday, tirado iyo noocyada tabo bar ee la qaatay. Dalacaada la siiyay ama la waayay/loo diiday, talabooyinka anshax marineed, badalka, fal-dambiyeedyada la galay, fasaxyada la qaato iyo dhacdooyinka ama xogaha kale ee ku haboon in faylka lagaliyo.

2. Faylka Gaarka ahi waa sir. Cidna ma eegi karto faylka gaarka, haddii aan laga haysan ogolaansho Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha

## Qodobka 37aad
## Dhaarta Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebaha

1. Sarkaal kasta oo ka tirsan Ciidanka Ilaalada Xeebahu waxa uu marka la magacaabo ka dib ku dhaaranyaa dhaartan hoos ku xusan:

*"Waxaan magaca ilaahay ugu dhaaranayaa inaan daacad u ahaanayo jamhuuriyadda somaliland; dalkeeda, dadkeeda iyo diinteedaba; iyo in aan u hogaansamo oo si daacad ah u illaaliyo dastuurka jamhuuriyada somaliland iyo xeerarkeeda, oo sidoo kalena aan ugu hoggansamo si aan hakrasho*

*lahayn awaamiirta madaxdayda sare ee sharciga waafaqsan.*

*Waxaan ku dhaaranayaa inaan u dhaqmo si sharaf leh, asluub wanaag iyo geesinimo xaalad kastoo lagu jiro mid dagaal iyo mid nabadgelyoba, anigoo illaalinaya sirta ciidammada iyo tan shaqadda, kuna dhaqaaqaya tallaabo kasta oo lagu sugayo xannaanaynta iyo daryeelka hantida ilaalada xeebaha"*

2. Taliayaha iyo Ku xigeenka Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha marka la magacaabo ka dib waxa dhaarinaya Guddomiyaha Maxkamdda Sare.

3. Dhamman Saraakiisha kale ee Ciidanka Ilaalada Xeebaha waxa dhaarinya Taliyaha Ilaalada Xeebaha.

## QAYBTA SIDDEEDAAD
## MIISAANIYADDA

### Qodobka 38aad
### Miisaaniyadda Iyo Maamulka Xisaabaadka Ilaalada Xeebaha.

1. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu yeelanayaa Miisaanaiyad u gaar ah oo isticmaalkeeda u madax banana yahay.

2. Miisaaniyadda Ciidanka Ilaalada Xeebaha waxa loo maamulayaa si waafaqsan Xeerka Xissabaadka Dawlada, Xeer nidaamiyaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha iyo habraacyada lagu soo saaro si waafaqsan Xeerkan.

3. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha iyo saraakiisha uu u igmado ayaa mas'uul ka ah isticmaalka, ilaalinta, kormeerka iyo dabo galka habsami u maamulka missaniyada Ciidanka Ilaalada Xeebaha.

### Qodobka 39aad
### Biladaha iyo Abaal Marinada

Wasiirka Arimaha Gudaha iyo Taliyaha ayaa awood sharci u leh in ay siiyaan abaal Marino bilado ama shahaado sharafyo saraakiisha iyo shaqaaleha kale ee Ciidanka Ilaalada Xeebaha, iyo cidda kale ee mutaysata in abaal Marin la siiyo

### Qodobka 40aad
### Hanti Dhawrka

1. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebahu waxa uu dhisayaa Guddi Hanti dhawr uu yeelanayo Ciidanka Ilaalda Xeebuhu.

2. Gudidaasi Hanti dhawr waxay ka koobnaaneysaa saraakiil ka tirsan Ciidanka Ilaalada Xeebaha oo aqoon iyo waayo aragnimo u leh maaliyadda iyo xisaabaadka.

3. Guddiga Hanti dhawrku waxa ay baadhitaan ku samayn kartaa Xisaabaadka Ciidanka Ilaalada Xeebaha.

### Qodobka 41aad
### Hantida Iyo Agabka Ciidanka Ilaalada Xeebaha

1. Agab kasto oo lagama maar-maan u ah fulinta iyo socod siinta hawlaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha, waxay yihiin Hantida Ciidanka Ilaalada Xeebaha.

2. Dhammaan hantida Ciidanka ilaalada Xeebaha waa in la galiyo diiwaan hantiyeed.

3. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waa in uu ka soo saaro awaamiir maamul maareynta iyo xisaabaadka hantida Ciidanka Ilaalada Xeebaha.

## QAYBTA SAGAALAAD
## QODOBO KAMA DAMBEYS AH

### Qodobka 42aad
### Xeer-Hoosaadyo

1. Wasiirka Arimaha Gudaha ayaa leh ansixinta xeer- hoosaad yada lagama maarmaan ka u ah dhaqan gelinta Xeerkan.

2. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu awood u leeyahay soo saaridda tilmaamayaal ama amaro maamul ee looga baahdo fulinta Xeerkan iyo Xeer-hoosaadyadiisa.

### Qodobka 43aad
### Laalis/Nasakhid

Xeerkani waxa uu Buruyey/laalay qodobada xeerkasta oo dabaqistiisu ka hor imanayso xeerkan, marka laga reebo xeer kale oo uu si cad xeerkani u ogolaaday dabaqistiisa

### Qodobka 44aad
### Dhaqangalka

Xeerkani waxaa uu dhaqan galayaa marka ay labada Gole ee Xeer-dejintu Ansixiyaan ee Madaxweynuhu Saxeexo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

ALLAA MAHAD LEH

| | |
|---|---|
| **Cabdirisaaq Siciid Ayaanle** | **Md. Baashe Maxamed Faarax** |
| **Xoghayaha Guud ee G/Wakiilada JSL** | **Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL** |
| ______________________ | ______________________ |